Shabakadda Xuquuqda Qaxoontiga ee Thailand Si wadajir ah dib-u-eegis xilliyeedka caalamiga ah ee Thailand Thailand Wareega 3aad, Kalfadhiyada 39aad

Tabarucayaasha: Asia Pacific Refugee Rights Network, Asylum Access Thailand, People Empowerment Foundation, Refugee Rights Litigation Project

Thailand qayb kama aha heshiiskii 1951kii ee la tacaluqayay xaaladda qaxoontiga ama habkii shuruucda ee 1967dii. Way tahay, si walba ha ahaatee qayb kamida heshiisyo kale oo la tacaluqa magangalyo-doonka iyo qaxoontiyada, sida hoos lagaga hadlay. Shabakadda Xuquuqda Qaxoontiga waxa loo aasaasay ujeedo gaar ah waxaanay beegsanaysaa in la milicsado xaalada magangalyo-doonka iyo qaxoontiyada Thailand dhexdeeda, magaalooyinka iyo xerooyinka macnaha guud oo ka imaanaya aragtiyaha ururada bulshada rayidka ah oo u dooda arrimaha qaxoontiga siiyana kaalmo magangalyo-doonka iyo qaxoontiga si toosan iyo si aan toosnaynba.

Shabakadda Xuquuqda Qaxoontiga ee Thailand Si Wadajir ah dib-u-eegis
Thailand wareega 3aad

Qaabdhismeedka sharci dejinta iyo dastuuriga ah: Habka Baaritaanka Qaranka

1. Inta ay Thailand martigalisay bulshooyin qaxoonti ah oo kala duwan tobannaan sano, Siyaasadaheeda qaranka ee ku saabsan qaxoontigu waxa uu ahaa mid kala daadsan, taasoo qaxoontigu ay ku dhex dhacayeen meelo bannaan. Bulshada qaxoontiga Thailand waxa loo qaybiyaa wax u dhexeeya qaxoontiyo degan xerooyin ku teedsan xadka Thailand iyo Mayanmaar (ilaa 92,000) iyo qaxoontiyo magaalo (qiyaastii 5,000).

2. Waqti xaadirkan, Thailand ma bixiso go'aaminta xaaladda qaxoontinimo. Laakiin UNHCR ayaa hadda fulinaysa doorkaas. Si kastaba ha ahaatee, 25kii Diisambar 2019, Dawladda boqortooyada Thailand waxay dhaqangalisay xeerka xafiiska ra'iisul wasaaraha ee baaritaanka shisheeyayaasha soo gala boqortooyada ee aan awoodin inay ku laabtaan dalkii ay kasoo jeedeen B.E 2562, taasoo abuurtay Habka Baarista Qaranka (NSM). In kastoo xeerarkan loola jeedo 'dadka la ilaaliyay' halkii qaxoontiyada, Xeerku waxa uu ahaa mid u dhaqan galay habka baarista qaxoontiga ee qaraarka golaha wasiirada, kaasoo baxay 10kii Jannaayo 2017. Xeerka ayaa dhaqan galay bishii Juun 22keedii 2020. Si kastaba ha ahaatee, waxa uu ilaa hadda ku jiraa marxaladda diyaarinta. Shuruudaha iyo tilmaamaha ayaan wali laga wada hadlin, faahfaahina intooda bandanna waxay yihiin qaar aan caddayn, oo ay ka mid tahay goorma ayuu qaxoontiga ka faa'idi doonaa ilaalooyinka lagu bixinayo dhexdeeda.

3. Waqti xaadirkan, ma cadda haddii ay RTG (dawladda boqortooyada Thailand) ay ka reebi doonto kooxo waqti xaadirkan ku hoos jira masuuliyadda golaha amniga qaranka, tusaale ahaan, dadka kasoo qaxaya khilaafka Mayanmaar, iyo sidoo kale Rohinga, Uyghur, Kuuriyaanka waqooyi, iyo kooxo lamida oo ah muhaajiriin ay haystaan

xaalado amni oo la tacaluqa siyaasadaha caalamiga ah ama si weyn u saamayn kara xiriirada caalamiga ah ee Thailand. Hadday sidaas tahay, kaliya tiro yar oo dad ah ayaa heli doona NSM (Habka Baarista Qaranka). Iyadoo la kordhinayo, hoos joogga sharciga Thai-ga iyo xuquuqda ku lifaaqan.

4. Talooyinka
    1) In la hubiyo ka qayb galka macnaha leh ee CSO ee hirgalinta NSM si loo bixiyo wax soo galinta iyo faallooyinka go'aaminaya shuruudaha baarista.
    2) In la hubiyo in NSM ay heli karto cid walba oo raadsanaysa magangalyo.
    3) NSM-ka iyo Hababka Hawgalka Caadiga ah (SOPs) waa in la waafajiyaa qeexitaanka qaxoonti ee heshiishkii 1951kii ee la tacaluqayay xaaladda qaxoontiga iyo in la waafajiyo sharciga iyo halbeegyada caalamiga ah, iyadoo ay ku jirto nidaamka xaqsoorka ah.
    4) Sida habka baaritaanku uu ku sheegay qodobka 20aad, Maamulka Thai-gu inay hubiyaan in codsadayaashu ay xaq u leeyihiin inay racfaan ka qaataan maxkamadda maamulka.
    5) In la hubiyo in codsadayaashu ay helaan matalaad sharci ah habka dhexdiisa.

Xuquuqda in lagu aqoonsado sharciga hortiisa

5. Sida ku cad qodobka 6aad ee caddaynta caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha iyo qodobka 16aad ee axdiga xuquuqda madaniga iyo siyaasadda, qof walba meel walba oo uu joogo waxa uu leeyahay xuquuqda in loo aqoonsado qof ahaan sharciga hortiisa. Intaa waxa dheer, dib-u-eegisteedii labaad ee caalamiga ahayd, Thailand waxay aqbashay talo bixintii Namibiya ee ahayd in "la hubiyo diiwaan galinta dhalashada ilmaha ku dhasha dhulkeeda….." Waxay xustay talo bixintii Kanada ee ahayd inay "siiyaan helitaanka sharci ee magangalyo-doonka iyo qaxoontiga

iyada oo aan la takoorayn" Iyo talo bixintii Faransiiska ee ahayd in ay "siiyaan sharci magangalyo-doonka iyo qaxoontiga"

6. Ilmaha u dhasha qaxoontiga Thailand dhexdeeda waxa loo diiwaan galin karaa dhalashada. In kastoo tani aanay siinayn wax xuquuq dheeraad ah iyo mudnaan gaar ah. Waa 'Aqoonsiga shakhsiyadda sharciga ah' ee Thailand si looga hortago dawlad la'aanta. Waxay kaloo u noqon kartaa caddeyn degenaanshaha Thailand oo horseeda oggolaanshaha joogitaanka ku-meel-gaarka ah. Si kastaba ha ahaatee, gaar ahaan marka la eego duruufaha magaalooyinka, waxaa jira dhibaatooyin xagga isgaarsiinta oo keenaya macluumaad qaldan oo ku yaalla shahaadada. Qaar kamida saraakiisha dawladda ayaan ka warqabin carruurta qaxoontiga waxayna u malaynayaan in carruurta qaxoontigu ay la mid yihiin carruurta ay dhaleen shaqaalaha muhaajiriinta ah.

7. Qaxoontiga waa in lagu aqoonsado sharciyada Thia-ga iyada oo loo marayo hannaanka NSM (Habka Baarista Qaranka). Weli waxa jira dib-u-dhac aan sababaysneen oo ku imanaya hirgelinta iyo welwelka laga qabo ka saaritaanka kuwa aan laga yaabin inay helaan NSM-ka.

8. Talooyinka
    1) In la kordhiyo aqoonta iyo wacyiga saraakiisha dawladda ay ka qabaan qaxoontiga. Gaar ahaan meelaha ay qaxoontigu caadi ahaan deggan yihiin.
    2) In la waafajiyo sharciyada khuseeya qaxoontiga, sida sharciyada socdaalka, sharciyada diiwaangelinta madaniga ah, si loo waafajiyo xaaladdooda iyo duruufahooda loona fududeeyo helitaan xuquuqda..

Xorriyad ka qaadista aan loo meel-dayin

9. 28kii Jannaayoy 2021, Kooxda shaqada ee Golaha Xuquuqda Aadanaha ee xariga aan loo meel-dayin waxay mar kale ku celiyeen in, Marka loo eego xeerka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha

Xarigga aan xadka lahayn ee shaqsiyaadka muddada dacwadaha socdaalku soconayo qiil ma noqon karo waana mid aan loo meel dayin... wakhtiga u badan ee xariga muddada dacwadda socdaalku soconayso waa in sharci lagu dejiyaa. Marka ay dhammaato muddada xariga ee sharciga lagu dejjiyay, waa in qofka xiran loo sii daayo si degdeg ah.

Intaa waxa dheer, Marka mabda'a ka dib-u-celin la'aanta ah uu ka dhigayo musaafurinta wax aan macquul ahayn,"qofka xiran waa in lasii daayaa si la isaga ilaaliyo xabsi aan xad lahayn inuu dhaco, kaas oo noqon doona mid aan loo meel dayin."

10. 2016kii , RTG (dawlada boqortooyada Thailand) waxay aqbashay talo soo jeedintii Hindiya oo ahayd in Thailand "ay wax ka qabato xaaladaha nololeed ee adag ee ka jira xarumaha lagu hayo dadka soo galootiga ah" Dawlada boqortooyada Thailand waxay sidoo kale xustay talo soo jeedintii Laksambarg oo ahayd in Thailand "ay soo afjarto xariga sharci darrada ah ee qaxoontiga iyo magangalyo doonka aanay joojiso xariga carruurta iyadoo lagu salaynayo xakamaynta socdaalka." Iyo talo soo jeedintii Barugwaay ee ahayd in Thailand "ay samayso siyaasad ogolaanaysa in la yareeyo heerarka sare ee tirade xad-dhaafka ah ee xarumaha dadka lagu hayo."

11. Shantii sano ee lasoo dhaafay. Dawladda Thailand waxa ka go'an inay soo afjarto haynta carruurta qaxoontiga ah ee Thailand, waxay ogolaatay oo qaadatay xeerka caalamiga ah ee socdaalka iyo qaxoontiga, waxay qaadatay baaqa ASEAN ee xuquuqda carruurta ee xaaladda socdaalka, waxay hirgalisay xasuus qorka isfahanka ee go'aaminta beddelka xabsiga carruurta ee hababka xarumaha socdaalka, (ATD MOU), Iyadoo ay wehelinayaan

Hababka Hawlgalka Caadiga ah (SOPs) waxayna dhidibtay Habka Baarista Qaranka (NSM) ee kor ku xusan. Si kastaba ha ahaatee, Qaxoontiga Thailand ayaa weli ku jira xabsi. Dawladda Boqortooyada Thailand waxay ku tiirsantahay dib-u-dejin qaxoonti iyo dib-u-noqosho ikhtiyaari ah si loo xalliyo kiiska. Si kastaba ha ahaatee, NSM-ka hoostiisa, Qaxoontigu qeexitaan ahaan awood uma laha inay ku laabtaan waddankii ay ka yimaadeen, dib-u-dejintuna way xaddidan tahay, Sidan oo kale, Xabsi ku hayntu waxay u eegtahay mid waqti dheer ah.

12. ATD MOU wuxuu horseeday horumar ku saabsan hab la dhaqanka dumarka iyo carruurta xabsiyada ku jira: In ka badan 230 dumar iyo carruur ah ayaa laga soo daayay xabsiga intii u dhexaysay 2019 iyo 2020 iyadoo loo sii marayo is beddelo ku salaysan bulshada iyo maaraynta kiisaska ee xariga. Si kastaba ha ahaatee, caqabado culus ayaa weli jira. Dawladda Thailand ayaa weli u aragta xiritaanka carruurta muraayadda amniga qaranka. Nidaamka ATD ee hadda jira wuxuu had iyo jeer diiradda saaraa xakamaynta iyo xaddididda xuquuqdoodaa halkii uu ka ahaan lahaa maarayn kiis oo dhammaystiran, taas oo aan ka turjumayn mabda'a-danta-ilmaha. Tusaale ahaan adeegsiga (Xarunta Daryeelka Maalinta) gudaha xarunta socdaalka ee carruurta iyo xubnaha qoyskooda sida mid ka mid ah xulashooyinka meelaynta ATD ee gobollada waa inaan loo tixgelin beddel xabsi. Carruurta qaar, sida carruurta Rohinga-ha ama carruurta kiisaskooda magangalyo ay UNHCR-tu xirtay, waa laga dhaafay ATD-da bulshada ku salaysan. Sidaa darteed, qaar badan oo iyaga ka mid ah ayaa ku jira hoyga dawladda si aan xad lahayn oo aan lahayn xal kale.
13. Xubnaha qoyska si gooni ah ayaa loo xiraa, ATD MOU inta waxay ka faa'idaysataa hooyooyinka xiran ee leh carruurta, ATD MOU wuxu ku guuldaraystay inuu hubiyo mabda'a midnimada qoyska maadaama uusan siinayn xulasho kale xubnaha qoyska, gaar ahaan aabayaasha, Helitaanka dammaanadda ee xafiiska socdaalka ayaa ah mid aad u xaddidan, marka loo eego go'aanka masuuliyiinta, taasoo leh xaalado culus, waxay ku xirantahay

tusaale ahaan, warbixinno soo noqnoqda, waxayna codsadaan lacag aad u badan oo dammaanad ah (50 kun oo baad) taasoo qaxoontiga ka xaddidaysa ikhtiyaarka kaliya ee lagaga sii dayn lahaa IDC-da ugu danbayna keenta kala tag qoys. Kiisaska qaar, Ururada Bulshada Rayidka ah waxa la ogaysiiyaa in carruurta laga soocay hooyooyinkood. Iskuduwid la'aanta haayadaha dawladda ayaa horseedaysa helitaan kooban oo ah aqoonsi caadi ah, u nuglaanta baaritaanka, iyo cabbirka qiimaynta. Sidaas darteed, waqtiga haynta carruurtu waxa uu qaataa wakhti aad u dheer.

14. **Talooyinka**
    1) Jooji dhaqanka waxyeellada leh ee lagu hayo qaxoontiga iyo magangalyo-doonka oo u isticmaal uun sida miciinka u danbeeya.
    2) Marka sii-dayntu aanay suurtogal ahayn, isla markiiba hirgeli beddelaadyo kale oo aan ahayn kuwo ilaalin ah oo ku salaysan bulshada. Kuwani waa inay bixiyaan soo dhaweyn habboon iyo kuwo aan ahayn kuwo haay'adeed ahayn. Iyo go'aanno kiis oo ilaaliya xuquuqda midnimada qoyska.
    3) Sii UNHCR iyo CSOs inay si aan xad lahayn u helaan baaritaanka dadka xiran ee hadda jira oo ay kaalmo lagama maarmaana siiyaan si ay u hubiyaan in dadka xiran ay sheegan karaan magangalyo haddii aanay awoodin inay sidaas sameeyaan markii la xiray ka hor.
    4) Hubi in dadka xiran ay heli karaan habka dammaanada waxaanad dhaaftaa lacagaha dammaanadda.
    5) Hubi in dadka haray ee xiran ay helaan dhakhaatiir caafimaad iyo la talin sharciyeed.

Mabda’a dib-u-celin la’aanta

15. Intii lagu guda jiray wareegga 2aad ee UPR ee 2016, Ururinta macluumaadka Qaramada Midoobay waxay ku Talisay Thailand inay ka fogaato dib-u-celinta magangalyo-doonka iyo qaxoontiga. Soo koobidda soo gudbinta daneeyayaasha ee UPR ayaa tilmaamay halista dib-u-celinta, waxayna jebisay mamnuucidda caalamiga ah ee dhanka ka ah dib-u-celinta.Thailand wax soo talo soo jeedin ah kamay helin arrintan 2016kii. Ilaa hadda, warbixinteedii beddelka ahayd ee guddiga CERD ee 2020, Guddiga xuquuqda Aadanaha Qaranka ee Thailand waxay soo jeedisay in dawladda Thailand ay dammaanad ka qaado inaysan dib ugu celin doonin magangalyo-doonka iyo qaxoontiga dalalkii ay ka yimaadeen iyadoo ku salaysan mabda’a dib-u-celinta. In kastoo ay Thailand aanay ka qayb ahayn heshiiskii 1951kii ee qaxoontiga iyo baratakoolkii 1967kii, Thailand waa inay xushmaysaa mabda’a dib-u-celin la’aanta ee ku xusan ICCPR (qodobka 7aad), CAT (qodobka 3aad) iyo sida uu yahay xaqsoorku.

16. Magangalyo-doonka iyo qaxoontiga Thailand jooga ayaa ilaa hadda bar-beegsi u ah dib-u-celinta. 2018kii qaxoonti ka imid Kamboodhiya ayaa loo musaafuriyay dalkii ay ka yimaadeen. Mid kamida dadka u dhaqdhaqaaqa shaqaalaha oo Kamboodhiyaan ah oo ay UNHCR-tu go’aamisay inuu qaxoonti yahay ayaa la xidhay oo dib loo celiyey. Intii ay ku jirtay xarunta laanta socdaalka, UNHCR-tu waxay ka qaaday waraysiga dib-u-dejinta, Kiiskeedana waxa racfaan looga qaaday maxkamadda racfaanka iyada oo loo cuskaday in ay jirto halis dhab ah musaafurinteeda. Si kasta ha ahaatee, Iyada waxa loo musaafuriyay Kamboodhiya.

Mas'uuliyiinta Thai'ga waxay sheegeen in musaafurintu ay ku hoos jirtay qaybta 54aad ee Sharciga Socdaalka B.E.2522, Waxayna ahayd xeer u dhexeeya Thailand iyo Kamboodhiya. bishii Diiseembar 2018, qof kale oo Kamboodhiyaan ah oo u dhaqdhaqaaqa shaqaalaha ayaa la xiray oo loo musaafuriyay Kamboodhiya kadib codsi ka yimid dawladda Kamboodhiya. In kastoo musaafiruntu ay ahayd mid sharci ah sida uu dhigayo Xeerka Socdaalka B.E.2522, qaybta 54aad, kiisaskani waxay muujinayaan inay Thailand ku guuldaraysatay inay ixtiraamto mabda'a dib-u-celin la'aanta iyo waajibaadka sida waafaqsan shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha. Sidaas darteed magangalyo-doonka iyo qaxoontiga Thailand ku nool waxay ka cabsi qabaan suurtagalnimada dib-u-noqoshada.

17. Farqadda 25aad (1) Ee NSM (Habka Baarista Qaranka) wuxuu sheegayaa in mar haddii qof la siiyay maqaam 'qof la ilaaliyay', xukuumaddu waa inay ka fogaataa dib-u-celinta qofka la ilaaliyay ee lagu celinayo dalkii uu kasoo jeeday." Si kastaba ha ahaatee , Xeerka waxa ku jira ka-reebitaan aad u ballaaran oo ku salaysan nabadgalyada qaranka, taas oo kale waxa laga yaabaa inaanay caqabad wax ku ool ah ku noqoto dib-u-celinta.

18. Talooyinka
    1) Dhaqangelinta sharciyada qaranka ee ku saabsan dib-u-celinta si loo hubiyo in magangalyo-doonka iyo qaxoontiga dib-u-celin aan lagu samayn iyadoo aanay jirin waxyaabo ka-reebitaan ah.
    2) Hubi in mas'uuliyiinktu ay ixtiraamaan mabda'a dib-u-celin la'aanta.

Xuquuqda dacwad cadaalad ah.

19. Dawladda Thailand ma fulineyso waajibaadkeeda caalamiga ah ee ku saabsan xuquuqda dacwad caddaalad ah, Magangalyo-doonka iyo qaxoontigu waxay marayaan dacwad ciqaabeed, sida socdaalka sharci-darrada ah ama dhagaysiga xariga, waxay si xaddidan u helayaan turjumaano iyo la-taliye sharci, iyagoo ku xadgudbaya qodobka 14(3) ee ICCPR. Thailand waxay leedahay iyadoo la jaanqaadaysa faallada guud Lambarka 32aad – waxay samaysay Nidaamka Garsoorka Dambiyada Carruurta, ilaa hadda, dhaqan gashan, Magangalyo-doonka iyo Qaxoontiga carruurta ah ayaa inta badan loo habka loo mariyaa sidii qof weyn oo kale marka la xirayo.

20. Iyadoo Dawladda Thailand ay bixinayso qaar ka mid ah adeegyada sharciga ee bilaashka ah, barnaamijyada noocan ahi ma daboolayaan kiisaska socdaalka ee aan joogtada ahayn iyo xabsi ku haynta. Dadka magangalyo-doonka ah iyo qaxoontigu waxay ku tiirsan yihiin kaalmada sharciga ah ee haay'adaha bulshada rayidka waxaanay ku raaxaystaan dhawr hab oo dammaanadeed, iyadoo uu ku jiro habsocodka nidaamka dhowrista ee lagama maarmaanka ah ee lagaga soo horjeedo xarigga muddada dheer ama aan xaddidnayn.

21. Maqaalka soo socda (14)3 ICCPR, Qaybta 13aad ee Xeerka Nidaamka Ciqaabta ee Thai-ga waxa uu dhigayaa in eedaysanuhu uu xaq u leeyahay turjumaan inta lagu gudo jiro baaritaanka iyo habka maxkamada. Si kasta ha ahaatee, Tusaaleyaasha qaar, Magangalyo raadiska iyo qaxoontiyadu waxay wali ku tiirsan yihiin ururada bulshada rayidka ah si ay ugu diyaariyaan adeegyo turjumaan. Tusaale ahaan, 2018 , Markii ay booliska laanta socdaalku ay xireen wiil Siri Lankan ah oo 17 jir ah aanay hor keeneen maxkamada caruurta, maxkamadu umay diyaarin turjumaan inkastoo eedaysanuhu uu ku hadlayay af Thai xaddidan. 2018, dacwadaha maxkamadda xarig ballaaran kadib, maxkamadu may waydiin in eedaysanuhu uu ku hadlayay Thai, Iyo in Asylum Access Thailand ay ahayd inay siiyaan turjumaan. 2019kii, Booliska Thai-ga waxay xireen ilmo Soomaali ah iyo qoys

Soomaali ah oo watay 3 carruura oo yaryar. Boolisku umay diyaarin turjumaan laakiin waxay isticmaaleen ilmihii Soomaaliga ahaa, kaasoo ku hadlayay waxoogaa af Thai ah si ay ula hadlaan qoyska Soomaalida ah. Waxa la waydiiyay inay sexeexaan warbixin iyadoo aan la siin turjumaad ku filan. Ilmihii Soomaaliga ahaa waa lasii daayay isla maalintaas, laakiin qoyskii, oo ay ku jiraan saddexdii carruur ahaa ayaa hebeenkaas lagu hayay xabsiga. Maalintii xigtay, kadib dhagaysigii maxkamadda, waxay qoyskii Soomaalida ahaa sexeexeen dukumentiyo dheeraad ah iyadoo aan la siin wax turjumaad ah oo ah nuxurka dukumentiyada

22. Xeerka ilaalinta carruurta iyo Xeerka Maxkamadda Carruurta iyo Qoyska iyo Xeerka Habraaca ayaa siinaya ilaalin gaar ah carruurta (dhalinta) marka la qaado dacwadaha ciqaabta, iyadoo la waafajinayo waajibaadka Dawladda Thailand sida uu dhigayo sharciga caalamiga ah. Ficil ahaan, boolisku had iyo jeer uma hoggaansamaan qodobbadaas marka ay xirayaan aanay ka baarayaan saldhigga booliska. Bishii August 2018, booliska socdaalka ayaa xiray 180 qof oo ka yimid Kamboodhiya iyo Fiitnaam, oo ay ku jiraan dumarka leh dhallaanka iyo carruurta yaryar, Carruurta waxaa laga soocay waalidkood iyadoon la tixgelin danta ugu fiican ee ilmaha Iyada oo ku xadgudubtay Xeerka Maxkamadda Carruurta iyo Qoyska, Boolisku waxay ku guuldaraysteen inay aqoonsadaan mid ka mid ah dadka la qabtay isagoo carruur ah. Intaa ka dib, waxay ku guuldarraysteen inay ilmahan hor keenaan Maxkamadda Carruurta Iyo Qoyska muddo 24 saacadood gudahood ah.Taa beddelkeeda, ilmaha waxaa lagu hayey hoolka xafiiska degmada ee dadka waaweyn laba maalmood ka hor intaan la hor keenin maxkamadda dadka waaweyn. Maxkammadu kumay wargelin ilmaha iyo dadka waaweyn ee la xirayba, dabeecadaha iyo sababta eedaymaha loo soo jeediyay. Booliska ayaa ilmaha kusii hayay saldhig boolis muddo lix maalmood ah iyada oo aan wax amar maxkamadeed ah jirin ka hor intaysan u dirin Maxkamadda Carruurta iyo Qoyska.

23. Bishii February 2021, booliska socdaalka ayaa xiray wiil 16 jir ah. Inkastoo ay garawsanaayeen inuu ilmo yahay, boolisku waxa uu diiday inu kiiska u gudbiyo Maxkamadda Carruurta iyo Qoyska, xitaa iyadoo ay jireen dadaalka UNHCR iyo ururada bulshada rayidka si ay ugu doodaan xuquuqda ilmaha. Tani waxay xadgudub ku tahay qodobka 70,72,73, iyo 78 ee Xeerka Habka Qoyska iyo Carruurta. Kaas oo dhigayaa kiiska xariga ilmaha, sarkaalka baaritaanku waa inuu ilmahaas hor keeno maxkamad 24 saacadood gudahood si loo xaqiijiyo xarig lana go'aamiyo haddii ilmuhu uu ku jiro gacanta dawladda ama waalidka. Ka dib markii qareenku ka codsaday makamadda dhalinta inay baaritaan ku sameyso xarigga ilmaha, maxkamaddu waxay oggolaatay kaliya codsigooda ah inay dejiso taariikhda dhageysiga maxkamadda shan iyo labaatan maalmood kaddib xarigga. Dhanka kale wiilkii ayaa lagu xiray xarunta lagu hayo dadka ee laanta socdaalka.

24. Talooyinka
    1) Hubi in magangalyo-doonka iyo qaxoontigu ay helaan gargaar sharci oo lacag la'aan ah dhammaan kiisaska dambiyada, dhagaysiga go'aaminta qaxoontinimo iyo dacwad kasta oo kale oo rasmi ah oo keeni karta in xorriyadda laga qaado.
    2) Hubi turjumaan bilaash ah kuna filan magangalyo-doonka iyo qaxoontiga waajahaya eedaymaha ama xarigga, sida loo baahanyahay sharciga Thai-ga, iyo in la hubiyo in kaalmada noocaas ahi ay u saamaxdo magangalyo-doonka iyo qaxoontigu inay fahmaan xuquuqdooda inta lagu gudo jiro heer kasta oo fal-dambiyeed.
    3) Dhaqangelinta Xeerka Ilaalinta Carruurta iyo Maxmadda Carruurta iyo Qoyska iyo Xeerka Habka si loo siiyo badbaado aan caadi ahayn carruurta magangalyo-doonka iyo qaxoontiga ah ee lagu qaadayo dacwadaha ciqaabta.

Xuquuqda caafimaad heerka ugu sarreeya ee la gaari karo

25. Sida uu dhigayo Axdiga Caalamiga ah ee Xuquuqda Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan, qof walba wuxuu xaq u leeyahay inuu ku raaxaysto heerka ugu sarreeya ee la gaari karo ee caafimaad oo ku habboon ku noolaanshaha nolol Sharaf leh, iyadoon loo eegin xaaladooda sharci. Intii lagu guda jiray wareeggii 2aad ee UPR ee 2016, Thailand waxay aqbashay talooyinka si loo hubiyo in si siman loo helo daryeel caafimaad dadka oo dhan loona dejiyo istiraatiijiyado lagu gaaro yoolalka horumarka joogtada ah, gaar ahaan khuseeya dhanka daryeelka caafimaadka Si kastaba ha ahaatee, Waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee Thailand ee hirgelinta iyo talooyinka iyo ballanqaadyada ikhtiyaarigaa ah ayaa muujiyay in hirgelinta kaliya ee la xiriirta xuquuqda caafimaadku ay ahayd MOU si loo hagaajiyo nidaamka maxaabiista. Ma jirin wax xusitaan ah oo ah kooxaha kale ee nugul ama magangalyo-doonka iyo qaxoontiga.

26. Caymiska caafimaadka dadweynaha Thai-ga wuxuu daboolayaa daaweynta iyo dhaqancelinta, dhiirigelinta caafimaadka, ilaalinta cudurka, ka hor-tagga iyo xakamaynta. Si kastaba ha ahaatee iyada oo hoos imaanaysa ogeysiiska Wasaaradda Caafimaadka Dadweynaha, magangalyo-doonka iyo qaxoontiga Thailand ma heli karaan caymiska caafimaadka dadweynaha. Sidaa darteed, halka qaxoontiga deggan xerooyinku ay waxoogaa daawayn ah ka helaan NGO-yada jooga xerada, Magangalyo-doonka iyo qaxoontiga magaalooyinku waa inay iska bixiyaan daaweynta cisbitaallada, taas oo caqabad maadaama aanay awoodin inay si sharci ah uga shaqaystaan Thailand dhexdeeda. Intaa waxa dheer, maxaa yeelay intooda badan ma haystaan sharci , waxay ka cabsadaan inay la xiriiraan mas'uuliyiinta Thai-ga, Sidaas daraadeed waxay inta badan tagaan Haay'adda Budhdhiiska ah

ee Tzu Chi oo qaxoontiga siisa bukaan socodka eegto bilaash ah. Warbixin la diyaariyay 2017kii, NHRCT waxay tilmaamtay dhibaatooyin ay qaxoontigu mareen iyagoo isku dayaya inay helaan kaalmo caafimaad, oo ay kamid tahay, dabeecadda sarkaalka iyo adkaanshaha fahanka dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha iyo shaqaalaha kale iyadoo ay sababtu tahay turjumaada oo xaddidan. Iyadoo NHRCT ay talo soo jeedino siisay Wasaaradda Caafimaadka Dadweynaha iyo xafiisyo kale, Dhibaatooyinku way sii jiraan, Cilmi-baaristii ugu dambeysay ee kusaabsaneyd xaaladda caafimaad iyo helitaanka daryeelka caafimaadka ee qaxoontiga ayaa lagu ogaaday in dadka magangalyo-doonka ah iyo qaxoontigu ay leeyihiin baahi aad u badan oo aan la dabooli karin marka loo eego dadka Thai-ga ah. Macquul gal maxaa yeelay ma laha caymiska daryeelka caafimaadka dadweynaha. [8]

27. Intaa waxa dheer, qaxoontiga magaalooyinka ayaa looga tagay inay naftooda maareeyaan inta uu socdo cudurka faafa ee COVID-19 Rugta caafimaad ee Tzu Chi ayaa si ku-meel-gaar ah loo xiray inta uu socdo cudurku, Dawladda Thailand na qaxoontiga kuma darin qorshayaasheeda jawaabta COVID-19, Iyadoo Thailand ay isu diyaarinayso qaybinta tallaalka, Magangalyo-doonka iyo qaxoontiga waa inaan la iska indha-tirin.

28. Helitaanka daryeel caafimaad IDC-da dhexdeeda waa mid xaddidan. Gaar ahaan marka la eego dhibaatooyinka ay keenayaan qolalka ciriiriga ah, fayadhawrka oo aan ku filnayn, iyo warbixinnada heerka sare ee arrimaha caafimaadka maskaxda. Adeegga caafimaadka ee IDC-du waxa uu hoos imaadaa Xafiiska Socdaalka, tilmaamaha daryeelkana lama wadaago. Waxa jira heerar daryeel caafimaad oo u yar IDC-da dhexdeeda. Kiisaska aadka u daranna waxaa loo gudbin karaa isbitaallada kaliya haddii adeegyada caafimaadka ee IDC-da ay sameeyaan gudbinta. Si kastaba ha ahaatee, CSOs waxaa soo gaaray cabashooyin ka yimid maxaabiistaa kuwaas oo seegay ballantii isbitaalka maxaa yeelay shaqaalaha cisbitaalku ma laha awood

ay ku galbiyaan. Intaa waxa dheer, waxa jira jahawareer ah in maxaabiista laga filayo inay bixiyaan kharashka daawayntooda.

29. Talooyinka
    1) Hubi in dhammaan bulshooyinka ku dhaqan Thailand ay helayaan caymiska caafimaadka dadweynaha.
    2) Meel mari sharci waajibinaya in xarumaha caafimaadku aanay wax ka waydiin karin bukaanka xaalada socdaalka aanay una gudbin karin warbixinta bukaanka maamulka socdaalka.
    3) Horumari helitaanka kaalmo caafimaad iyadoo la horumarinayo adeegga turjumaadda ee xarumaha caafimaadka.

Xuquuqda waxbarashada

30. Dawladda Thailand ayaa muddo dheer muujineysay sida ay uga go'an tahay siyaasadda Waxbarashada qof walba ee (EFA). Inkastoo ay haysato boos qodobka 22aad ee heshiiska qaramada midoobay ee xuquuqda carruurta (CRC) ee la xiriira xuquuqda carruurta qaxoontiga iyo magangalyo-doonka, Thailand waxay xaqiijisay horumarkeeda ku aaddan kor u qaadista xuquuqda dhammaan carruurta soo-galootiga ah ee adeegyada dadweynaha tan iyo markii ay qaadatay CRC 1992kii. Si kastaba ha ahaatee, warbixintii GEM ee 2019ka ee ciwaankeedu ahaa "Dhisitaanka buundooyinka, Maaha darbiyada" ayaa waxa ay xustay in Thailand dhexdeeda, in kastoo siyaasadda loo beddalay in la ballaariyo ka-mid-ahaanshaha dadka aan sharciga lahayn "qof" ahaan ee sharciga waxbarashada ee 1999 kadib qaraarkii 2005, wali ma aysan hirgelin si loo horumariyo ka-mid-noqoshada waaxda waxbarashada.

31. Horumarinta nidaamyo waxbarasho oo is barbar socda oo ah in qaxoontiga iyo muhaajiriintu ay maareeyaan ayaa caqabad ku ah

helitaanka waxbarasho tayo leh. Qiyaastii in ka badan 60% carruurta muhaajiriinta ee ku nool Thailand ayaan dugsi ku jirin. Waxaana jira laba bixiye waxbarasho oo waaweyn oo siiya kuwa dhiganaya dugsiyada: Xarumo Waxbarasho (L.C.s) iyo Dugsiyo Thai ah.

32. In kastoo la arkay korodhka tirada carruurta muhaajiriinta ee soo galeysa dugsiyada Thia-ga ah, haddana waxaa jira caqabado hor taagan carruurta muhaajiriinta ee wax ka barta dugsiyada Thai-ga. Is-afgaranwaaga EFA, Ka warqab la'aanta hirgelinta EFA ee bulshooyinka dhexdooda, iyo takoorka adeeg bixiyayaashu ay ku hayaan ilmaha muhaajiriinta. Caqabad dhaqaale iyo mid luuqadeed ayaa ah caqabadaha carruurta muhaajiriintu ay la kulmaan Thailand dhexdeeda. Arrimahan ayaa u kaxeeya carruur badan oo muhaajiriin ah inay iska diiwaangeliyaan L.C.s-yada. Kuwaas oo aanay si rasmi ah u aqoonsanayn dawladaha Thailand iyo Mayanmaar. Helitaanka waxbarashada aasaasiga ah iyada oo aan la haysan wax aqoonsi ah ayaa si aad ah u xaddidaysa xulashooyinkooda mustaqbalka.
33. In kastoo u-guuridda carruurta qaxoontiga iyo muhaajiriinta ah ee iskuulada Thai-ga ay suurtogal tahay, waa in dariiqa la dajiyaa oo la jaangooyaa si kor loogu qaado danaha ugu wanaagsan ee carruurta. Maadaama carruurta soo galootiga ah ay inta badan ku dhibaatoonayaan inay ku hadlaan luuqada Thai-ga sidaas darteedna looga tago. Isticmaalka aqoonta ku saleysan afka-hooyo si loo horumariyo barashada ilmaha waa in la horumariyaa si ay u noqoto waxbarasho ku habboon dhammaan. Carruurta qaxoontiga iyo muhaajiriinta waa inay awoodaan inay ilaashadaan aqoonsigooda oo loo oggolaado inay adeegsadaan afkooda hooyo. Iyadoo lagu bilaabayo luuqada Ingiriisiga dugsiyada Thai-ga dhexdooda, luuqadaha gobolka ee ku jira habka waxbarashada luuqadaha badan waxay kor u qaadaysaa tayada waxbarashada carruurta qaxoontiga iyo muhaajiriinta.

34. Xorriyadda dhaqdhaqaaqu waxay u oggolaanaysa carruurta inay helaan waxbarasho aanay horumariyaan fursado badan oo wax ku biirin kara bulshada Thai-ga. Si kastaba ha ahaatee, xaddidaadda dhaqdhaqaaqa qaxoontiga, hab-nololeedka iyo waxbarashadooda ayaa si weyn u saamaysay fursadahooda. Siyaasadda dejinta ee hadda jirta ee lagu soo rogay qaxoontiga ku teedsan xuduudda ayaa ku cidhiidhinaysa carruurta ku dhashay , ku barbaaray, kuna xanniban Thailand mustaqbal rajo leh inta ay sugayaan xal. Intaa waxa dheer, waxbarashadu waa inay ilaalisaa oo ay ogolaataa carruurta naafada ah, si aanay u noqon kuwo laga tagay. Furitaanka helitaanka waxbarashada ee qaxoontiga iyo dadka aan sharciyeysnayn ee heer walba leh ayaa ah xal waara.

35. Talooyinka

    1) Aqoonsi buuxa iyo hirgelinta waxbarashada dadka oo dhan (EFA) iyadoo wax laga qabanayo lana hubinayo in dadka aan sharciyeysnayn iyo qaxoontiga iyo dadka naafada ah lagu soo daro waaxda waxbarashada Thai-ga si loo maro waddo xal waara.
    2) Fududaynta xannibaadaha dhaqdhaqaaqa lana oggolaado beddelasha carruurta qaxoontiga iyo muhaajiriinta iyadoo la aqoonsanayo waxbarashadooda.
    3) Hubinta tayada waxbarashada iyadoo la oggolaanayo aqoonsiga waxbarashada afafka badan ee kusalaysan afka hooyo (MTB-MLE) ee nidaamka waxbarashada ee Thai-ga lagana hor tago lumitaanka aqoonsiga carruurta aan sharciyaysnayn.
    4) Si loo kordhiyo ka mid-noqoshada waxbarashada ee ilmaha soo galootiga ah, hirgelinta siyaasadda waxbarashada dadka oo dhan, waa in si buuxda loo aqoonsadaa dhammaan qodobada. Wasaaradda

Waxbarashada (MoE) waa inay si firfircoon u dhiirrigelisaa una taageertaa dhammaan xuquuqda carruurta ee waxbarasha Thailand. Tan waxaa ka mid ah kor u qaadista wacyiga “hoggaamiyayaal dugsi oo badan” si siyaasadaha diiwaangelinta iyo meelaynta loo dhaqangeliyo.

Xuquuqda shaqada

36. Dawladda Thailand ma fulinayso waajibaadkeeda caalamiga ah ee ku saabsan xuquuqda shaqada. Thailand waxay samaysay dhawr waajibaad iyo ballanqaadyo caalami ah oo khuseeya xaqa qaxoontigu u leeyihiin inay shaqeeyaan. Tusaale ahaan, sida uu dhigayo ICESCR qodobka 6(1), sidoo kale, qodobka 5 (e)(i) ee ICERD wuxuu dammaanad qaadayaa qof walba—oo ay ku jiraan kuwa aan u dhalan’ “xuquuqda shaqada” iyo (doorashada xorta ah ee shaqaalaynta” waxaana ka mid ah waajibaadka in Meesha laga saaro carqaladaha ka hortaagan ku raaxaysiga xaqqa shaqo. Guddiga ciribtirka takoorka ayaa sidoo kale hoosta ka xarriiqa waajibaadka dawladuhu inay fuliyaan tallaabooyin lagu hubinayo in dadka aan u dhalan aysan la kulmin takoor xaaladdooda shaqo ama shuruudaha shaqada.

37. Si kastaba ha ahaatee, sababtoo ah sharciga gudaha Thailand si sharci ah uma aqoonsana heerka qaxoontinimo, qaxoontiga iyo magangalyo-doonka waxaa loola dhaqamaa sidii muhaajiriin sharci-darro ah guud ahaanna looma oggola inay ka shaqeeyaan Thailand, Aragti ahaan sharciga ilaalinta shaqada ee Thailand iyo sharciyada kale ee gudaha ayaa si siman u khuseeya dadka aan u dhalan waana inay bixiyaan xoogaa difaac ah oo ka dhan ah xadgudubka. Ficil ahaan, si kastaba ha ahaatee, kormeer aan ku filnayn iyo hirgelinta shuruucda shaqaalaha ee Thailand, oo ay weheliso qaxoontinimadooda xaalad sharci la’aan ah, waxay qaxoontiga usoo saari kartaa dhiig-miirashada, loo-shaqeeyayaasha aan damiirka lahayn waxay bixin karaan

mushahar dhiig-miirasho ah, waxay qaxoontiga ka dhigi karaan kuwo ka shaqeeya waxyaabo sharci darro ah, ka haysan karaan mushaharka qaxoontiga, iyo inay si aan sabab la'aan ah u joojiyaan shaqaalaynta, qaxoontiguna waxay haystaan ikhtiyaar yar oo ay ku aqbalaan shaqada maadaama ay u baahan yihiin inay helaan lacag si ay u badbaadaan. Marka uu khilaaf jiro dhanka loo-shaqeeyaha, qaxoontiga ayaa ka cabsi qaba inay caddaalad raadsadaan iyo ilaalo sharci kiisaskooda sharci la'aan darteed. Xitaa kiisaska daran dhexdooda marka uu qof qaxoonti ah naftiisa ku waayo shaqada, xubnaha qoyska ee badbaaday waxay u baahanyihiin la-talin sharci si ay u fahmaan xuquuqdooda. Caawimo ka imanaysa Asylum Access Thailand, ugu danbayntii waxay awoodeen inay kiiska uga warbixiyaan booliska, kuwaaso la sameeyay wada-hadal loo-shaqeeyaha. Xitaa markaas kadib, qoysku waxay heleen xaddi magdhaw ah oo ka yar marka loo eego waxa ku xusan sharciga.

38. Dakhli yaraan amaa dakhli-la'aan jirta, magangalyo-doonka iyo qaxoontigu aad ayay ugu adagtahay inay qoyskooda daryeelaan, iyadoo ay ku jirto awoodidda inay daboolaan kharashaadka daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada carruurtooda. Jiritaan la'aanta xaquuqda shaqadu waxay ku qasbaysa ku tiirsanaanta gargaarka bani-aadannimada ururada bulshada rayidka ah, haay'adaha caalamiga ah, iyo haay'adaha qaramada midoobay waxaanay ku duushaa awooddooda dib-u-dhiska noloshooda.

39. Iyadoo la rajaynayo in Habka Baarista Qaranka inuu siiyo qaxoontiga xuquuqo cayyiman, xuquuqda shaqadu kuma jirto. In kasta oo Xeerka Degdegga ah ee Maaraynta Shaqada ee Ajaanibta B.E.2560(2017), Qeybta 63aad waxaa laga yaabaa in lagu dabaqo dadka ku jira xaalad (qaxoonti oo kale ah), sharcigana lama dhaqangelin karo ilaa Dawladda Thailand ay soo saarto Go'aanka Golaha Wasiirada. Haddii Dawladda Thailand ay ku dari lahayd xaqqa shaqo, waxay noqon lahayd

tallaabo la taaban karo in la waafajiyo hab-dhaqankeeda waafaqsan heshiisyada xuquuqda aadanaha ee ay saxiixday.

40. Faafidda COVID-19 waxay sii xumaysay saamaynta ka-reebitaanka qaxoontiga ee suuqa shaqada. Baaritaankii Asylum Access Thailand ee 74 qof oo ah qaxoontiga ku nool bulshooyinka magaalooyinka bishii Maarso 2020ka, 85 boqolkiiba qaxoontigii sida sharci darrada ah u shaqaynayay ayaa shaqadooda waayay oo aan heli karin nidaamka magdhawga ee dawladda. Kala badh jawaabayaasha ayaa ku khasbanaaday inay lacag kasoo amaahdaan dadka kale amaba iska bixin kari waayay kirada iyo alaabta lagama maarmaanka ah ee xubnaha qoyskooda, sida alaabta nadaafadda, sahayda ilmaha iyo biyaha la cabbo. Waxay ku khasbanaadeen inay carruurta ka saaraan dugsiga sababtoo ah may haysan lacag ay isaga bixiyaan gaadiidka. Dawladda Thailand waxay lahayd hab u faa'idayn kara in ka badan 90% qaxoontiga Thailand jooga: Jannaayoa 26keedii 2021, Go'aan Golaha Wasiiradu ansixiyeen ayaa oggolaaday shaqaalaha muhaajiriinta ka yimid Mayanmaar, Laos iyo Kamboodhiya, kuwa ku jira Xarunta Laanta Socdaalka ee sugaya inay ku laabtaan dalkii ay ka yimaadeen laakiin aan laaban karin COVID-19 dartii, in lasii daayo aanay shaqaystaan. Haddii Thailand ay siyaasaddan u ballaariso qaxoontiga iyo magangalyo-doonka, waxay si isku mid ah u ilaalin doontaa xuquuqdooda una xoojin doontaa shaqaalaheeda markay bilowdo dib-u-dhiskeeda inta ay xudduduhu ahaanayaan kuwo xiran.

41. Talooyinka

1) In la meel mariyo Xeerka Degdegga ah ee Maareynta Shaqada ee Ajaanibta B.E.2560(2017) wax-ka-beddelka Lambarka.2aad B.E2561(2018) Qeybta63aad, ee loogu talo galay qaxoontiga xerooyinka iyo kuwa magaalooyinkaa jooga si ay u helaan xuquuq shaqo.
2) Wax-ka-beddel xeerka Habka Baarista Qaranka si loo siiyo qaxoontiga iyo magangalyo-doonka xuquuqda shaqo, oo ay ku jirto inta la qiimaynayo sheegashadooda iyo racfaankooda.

3) Bixi ilaalin si loo hubiyo in qaxoontigu ay kula xisaabtami karaan loo-shaqeeyayaasha ka faa'idaysiga, xadgudubka iyo ku shaqaynta xaaladaha khatarta ah.

Qaxoontiga Uyghur-ka

42. Ilaa 50 magangalyo-doon oo Uyghur ah ayaa ku haray Thailand hadda, waxa loo qaybiyay kooxo yaryar waxaanay ku jiraan xarumo badan oo kuwa laamaha socdaalka ee Thailand ku yaalla. Waxa jiray cadaadis ka imanayay adduunka dhan markii ay Thailand 120 magangalyo-doon oo Uyghur ah ay u musaafurisay Shiinaha 2015kii. Musaafirintu waxa ay ku xiriirsanayd qaraxii Bangkok ka dhacay isla sannadkaas, waxaanay mid kamid ah sababaha ugu waawayn ee Dawladda Thailand ay ula dhaqanto Uyghur-ka sidii koox gaar ah oo khusaysa amniga qaranka. Siyaasadina uma faa'idayso Uyghur-ka si ay ugu raaxaystaan ilaalada, Uyghur-ka u bandanna waxay Thailand ku joogaan sharci darro. Taas oo macneheedu yahay inay bar-beegsi u yihiin xarig aan loo meel-dayin.
43. Uyghur-ka waxa loo tixgaliyaa koox gaar ah, oo ay maamulaan haay'adaha amniga qaranka, kamana helaan UNHCR-ta ilaalin maadaama oo laga hortagay inay iska diiwaan-galiyaan Habka Go'aaminta Xaaladda Qaxoontinimada. Uyghur-ka ku jira xarumaha laamaha socdaalka wax kaalma ah kama helaan CSOs-ka waxaana loola dhaqmaa si ka duwan maxaabiista kale khusaymaha amniga qaranka dartii. Si ka duwan kiisaska la midka ah ee maxkamadda, waxaa xaddidan kaalmada CSO loomana oggola inay baaraan dacwadaha Uyghur-ka. Inta badan Uyghur-ka ayaa gaar loo soocay Xarumaha Laamaha Socdaalka kuna jira xaalado laga xumaado tan iyo markii la xiray (Ilaa 2013 ilaa hadda). Ururka Xoojinta Dadka ayaa isku dayay inu xareeyo warqad si loo dammiinto kuwa nugul, sida kuwa da'da ah ama

dadka xanuunsan, laakiin Dawladda Thailand ayaan oggolaan. Uyghur-ka inta badan waa Muslim, laakiin habdhaqanka IDC-du waa mid aan ku filnayn mana raacsana waxyaabaha ay aaminsanyihiin iyo dhaqamadooda. Guud ahaan. Ma jirto cunto xalaal ah oo la siiyaa. Cuntooyinka waxa ku jira waxyaabo aanay Muslimku cuni karin, marka laga reebo xarunta ku taalla Ranong taas oo siisa cunto xalaal ah maxaa yeelay waxaa jira maxaabiis badan oo Rohinga ah oo sidoo kale muslin ah. Si kasta ha ahaatee, xarumaha laamaha socdaalka qaar kamid ah ayaa laga yaabaa inay dadka bannaanka jooga u oggolaadaan inay cunto xalaal ah usoo diraan maxaabiista muslimka ah xilliyada soonka.

44. Talooyinka
    1) Hubi dib-u-celin la'aanta dibna ha ugu dirin dadka Uyghur-ka Shiinaha.
    2) Uyghur-ka u oggolow inay UNHCR ka codsadaan qaxoontinimo dib-u-dejin.
    3) Hubi in siyaasadaha khuseeya dadka Uyghur-ku ay waafaqayaan heerarka caalamiga ah, iyadoo ay ku jirto xaaladda IDC-da in maxaabiista Uyghur-ku ay helaan dammaanad.
    4) Maxaabiista Uyghur-ka waa in lagula dhaqmo xushmad diintooda darteed iyo iimaankooda, lana hubiyaa in maxaabiista Muslinka ah la siiyo cunto xalaal ah.
    5) IDC-du waa inay CSOs u oggolaato inay booqdaan kaalmana siiyaan maxaabiista Uyghur-ka.

FAAHFAAHIN

[1] UNHCR, "Qaxoontiga Thailand dhexdeeda," *UNHCR*, https://www.unhcr.org/th/en.

[2] Xafiiska golaha dawladda, Nor Ror 0907/449, December 18, 2019, https://resolution.soc.go.th/PDF_UPLOAD/2562/9933420829.pdf.

[3] Macluumaadka UPR, 2RP: Jawaabaha, talooyinka iyo balanqaadyada ikhtiyaariga ah, September 23, 2016, https://www.upr-info.org/sites/default/files/document/thailand/session_25_-_may_2016/recommendations_and_pledges_thailand_2016.pdf, p.5, para. 158.56.

[4] Macluumaadka UPR, 2RP: Jawaabaha, talooyinka iyo balanqaadyada ikhtiyaariga ah, September 23, 2016, https://www.uprinfo.org/sites/default/files/document/thailand/session_25_-_may_2016/recommendations_and_pledges_thailand_2016.pdf, p. 16, para. 159.67

[5] Macluumaad UPR, 2RP: Jawaabaha, talooyinka iyo balanqaadyada ikhtiyaariga ah, September 23, 2016, https://www.uprinfo.org/sites/default/files/document/thailand/session_25_-_may_2016/recommendations_and_pledges_thailand_2016.pdf, p. 16, para. 159.68

[6] U.N. Golaha Xuquuqda Aadanaha, *fikradaha ay qaateen kooxda ka shaqaysa xadhiga aan loo meel-dayin kalfadhigoodii 89aad,*

23–27 November 2020, U.N. Doc. A/HRC/WGAD/2020/70, January 28, 2021, para 106.

[7] U.N. Golaha Xuquuqda Aadanaha, *fikradaha ay qaateen kooxda ka shaqaysa xadhiga aan loo meel-dayin kalfadhigoodii 89aad, 23–27 November 2020*, U.N. Doc. A/HRC/WGAD/2020/70, January 28, 2021, para 107.

[8] Macluumaad UPR, 2RP: Jawaabaha, talooyinka iyo balanqaadyada ikhtiyaariga ah, September 23, 2016, https://www.uprinfo.org/sites/default/files/document/thailand/session_25_-_may_2016/recommendations_and_pledges_thailand_2016.pdf, p. 11, para. 158.179.

[9] Macluumaad UPR, 2RP: Jawaabaha, talooyinka iyo balanqaadyada ikhtiyaariga ah, September 23, 2016, https://www.uprinfo.org/sites/default/files/document/thailand/session_25_-_may_2016/recommendations_and_pledges_thailand_2016.pdf, p. 11, para. 158.180

[10] U.N. Golaha Xuquuqda Aadanaha, Isku-dubaridka uu diyaariyay xafiiska wakiilka sare ee qaramada midoobay u qaabilsan xuquuqda aadanaha si waafaqsan farqadda *15 (b) iyo farqadda 5aad ee lifaaqa qaraarka golaha 16/21*, U.N. Doc. A/HRC/WG.6/25/THA/2, March 7, 2016, para. 70.

[11] U.N. Golaha Xuquuqul Insaanka, Soo-koobidda uu diyaariyey Xafiiska Wakiilka Sare ee Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha si waafaqsan farqadda 15 (c) ee lifaaqa Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1 iyo farqadda 5aad ee lifaaqa qaraarka Golaha 16/21, U.N. Doc. A/HRC/WG.6/25/THA/3, February 23, 2016, para. 67.

[12] U.N. Golaha Xuquuqul Insaanka, Soo-koobidda uu diyaariyey Xafiiska Wakiilka Sare ee Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Aadanaha si waafaqsan farqadda 15 (c) ee lifaaqa Golaha Xuquuqda Aadanaha 5/1 iyo farqadda 5aad ee lifaaqa qaraarka Golaha 16/21, U.N. Doc. A/HRC/WG.6/25/THA/3, February 23, 2016, para. 71.

Guddiga Xuquuqda Aadanaha Qaranka ee Thailand, "Warbixin geddisan oo Ku Saabsan Hirgelinta Thailand ee Ku -Dhaqanka Heshiiska Ku Saabsan Ciribtirka Dhammaan Noocyada Takoorka Isirka
(CERD) ee ay samayeen Guddiga Qaranka ee Xuquuqda Aadanaha ee Thailand (NHRCT)
",https://tbinternet.ohchr.org/_layouts/15/treatybodyexternal/Download
.aspx?symbolno=INT%2fCERD%2fIFN%2fTHA%2f42390&Lang=en, p. 13.

[13] Xukunka maxkamada degmada koonfurta ee Bangkok No. Tor Or.5/2561.

[14] Yiamyut Sutthichaya iyo Thaweeporn Kummetha, "heshiiskii BangkokPhnom Penh? Ee musaafurinta Sam Sokha iyo mustaqbal aan la hubin ee musaafurinta Thailand,"
Prachathai, February 23, 2018, https://prachatai.com/english/node/7645.

[15] Reuters, "Kamboodhiyaan u dhaqdhaqaaqda xuquuqda shaqada ayaa laga musaafirayay Thailand," *Bangkok Post*, December 7, 2018, https://www.bangkokpost.com/world/1589702/cambodian-filmmakerfaces-deportation-from-thailand.

[16] Cahdiga caalamiga ah ee xuquuqda siyaasadda iyo rayidka. (ICCPR), ee la ururiyay December 16, 1966, G.A. Res. 2200A (XXI), U.N. Doc. A/6316, ay ansixisay Thailand, qodobka. 14(3).

[17] Xeerka nidaamka ciqaabta ee Thailand, 1934, B.E. 2477, qaybta 13aad.

[18] Xeerka ilaalinta carruurta ee Thailand, 2003, B.E. 2546, qaybta 22aad.

[19] Maxkamadda carruurta iyo qoyska ee Thailand iyo xeerka hab-marinta kiiska qoyska iyo carruurta, 2010, B.E. 2553, qaybta 70aad iyo 72aad.

[20] Maxkamadda carruurta iyo qoyska ee Thailand iyo xeerka hab-marinta kiiska qoyska iyo carruurta, 2010, B.E. 2553, qaybta 73.

[21] Maxkamadda carruurta iyo qoyska ee Thailand iyo xeerka hab-marinta kiiska qoyska iyo carruurta,, 2010, B.E. 2553, qaybta 70aad, 72aad, 73aad, iyo 78aad.

[22] Xeerka nidaamka ciqaabta ee Thailand, 1934, B.E. 2477, qaybta 90aad.

[23] U.N. Golaha Xuquuqda Aadanaha, Warbixinta Kooxda Shaqada ee Dib -u -eegis xilliyeedka Caalamiga ah ee Thailand, U.N. Doc. A/HRC/33/16, July 15, 2016, para. 158.37, 158.70, 158.145, 158.146, 158.151, 158.152, 158.154.

[24] Macluumaadka UPR, " *Tilmaamaha fulinta Thailand ee talooyinka iyo ballanqaadyada ee ku hoos jira wareegga labaad ee Dib-u-eegis xilliyeedka Caalamiga ah 2016-2018 (Cusboonaysiinta muddada dhexe)",* https://www.uprinfo.org/sites/default/files/document/thailand/session_25__may_2016/thailandimplementation2ndcycle.pdf, p.9.

[25] Golaha Xuquuqul Insaanka Qaranka ee Thailand, "Warbixinta No. 5/2560 ee ku saabsan xaqa ka faa'iidaysiga adeegga caafimaadka dadweynaha iyo daryeelka dawladda ee la

xidhiidha xaqa iyo xaaladda shakhsiga haddii ay dhacdo helitaanka adeegga caafimaadka dadweynaha ee qaxootiga magaalooyinka iyo magangalyo -doonka", 2017, http://library.nhrc.or.th/ulib/document/report/report2560_5E.pdf.

[26] *Ibid*

[27] Rapeepong Suphanchaimat et al., Helitaanka xaalaada iyo daryeelka caafimaad ee qaxoontiga dhexdiisa ee Bangkok middan hadda ka fiican. 20192020: Health status and healthcare access amongst urban refugees in Greater Bangkok, Thailand,20192020: falanqaynta siyaasadda iyo sahanka baahida aan la daboolin Aasaaska Barnaamijka Siyaasadda Caafimaadka Caalamiga ah, Nonthaburi, December 1, 2020, pp.69.

[28] Thana Boonlert, "ilaalinta kuwa ugu nugul Asean," Bangkok Post, November 2, 2019,
https://www.bangkokpost.com/thailand/general/1785419/protectingaseans-most-vulnerable

[29] GEM, "Dhisidda buundooyin maaha darbiyo", 2019, https://unesdoc.unesco.org/ark:/48223/pf0000265866, p. 44.

[30] Haay'adda Badbaadinta Carruurta iyo ta Waxbarashada Adduunka, , "Waddooyinka mustaqbal ka wanaagsan:
Dib u Eegista Waxbarashada Carruurta Muhaajiriinta ah ee Thailand ",2014,
http://thailand.worlded.org/wpcontent/uploads/2016/04/MESR-Policy-Brief.pdf, p. 2. [32] Haay'adda qaramada midoobay ee Waxbarasha, Sayniska iyo Dhaqanka,
""Dhibaatada qarsoon: Colaadda hubaysan iyo waxbarashada", 2010, https://unesdoc.unesco.org/ark:/48223/pf0000190709

[33] Hadafyada qaramada midoobay ee horumarinta joogtadad ah ee Waxbarashada, Sayniska, iyo Dhaqanka, socdaalka “Barakaca iyo Waxbarashada” Dhisidda buundooyinka maaha Darbiyada,”, 2019, https://unesdoc.unesco.org/ark:/48223/pf0000265866, p. 44.

[34] CERD, Talo-soo-jeedin Guud oo ku Saabsan Takoorka lagula kaco Dadka aan muwaadiniinta ahayn, para. 29.

[35] CERD, Soo -gunaanadkii Indha -indhayntii Warbixinnada Muddadii Tobnaad ilaa Saddex iyo Tobnaad ee Israa'iil, U.N. Doc. CERD/C/ISR/CO/13, June 14, 2007, para. 26.

[36] Xeerka socdaalka Thailand, B.E. 2522, 2017, qaybta 34.

[37] Haay’adda sharciga caalamiga ah ee Siam, "Ilaalada shaqaalaha ee shaqaalaha ajaanibta ah ee Thailand
," H.G. Legal Resources, https://www.hg.org/legal-articles/labor-protection-for-illegal-foreignworkers-in-thailand-36722

[38] Xeer -hoosaadka Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ee Baaritaanka Shisheeyaha soo gala Boqortooyada ee aan ku laaban karin Dalkii ay ka yimaadeen B E 2562, December 25, 2019.

[39] Asylum Access Thailand, " *Falanqaynta Saamaynta COVID-19 iyo qiimeynta baahida Degdegga ah ee Qoyska* ", June 2020, https://drive.google.com/file/d/1h5ZADNKDqjTt7F1aKmnKyuDyr_UK
7UvZ/view

[40] Qaraarkii golaha wasiirada ee January 26, 2021 ee oggolaaday in la sii daayo maxaabiista 3 dal oo jaar ah oo aanay shaqeeyaan.
, http://www.ratchakitcha.soc.go.th/DATA/PDF/2564/E/035/T_0046.PDF